

## Sharciga 71aad waa la ansaxiyey: Bayaan ka socda Wasiir Copping

Abriil 21, 2021

---

Wasiirka Shaqada iyo Socdaalka Jason Copping wuxuu soo saaray bayaanka soo socda ee ku saabsan ansixinta Sharciga 71: Heerarka Shaqaalaynta (Fasaxa Tallaalka KOOFID (COVID Vaccination Leave) Wax ka Bedelka Xeerka, 2021:

"Maaddaama barnaamijka tallaalka gobolkeenna uu sii socdo in la tallaalo reer Alberta badan, waxaan sii wadeynaa falcelin aan ku ilaalineyno nolosha iyo habnololeedka.

"Dowladda Alberta waxay soo saartay sharci wax ka beddelaya Xeerka Heerarka Shaqaalaynta si loo hubiyo in dadka Alberta ee shaqeeya ay heli karaan mushahar, fasax shaqo ilaalin ah si ay u helaan tallaalka kasta oo KOOFID-19 ah.

"Anaga oo meel marinay sharcigan, waxaan yareyneynaa caqabadaha hortaagan shaqaalaha Alberta inay is tallaalaan. Tani waxay ka dhigan tahay in reer Alberta aysan kala dooran doonin inay is tallaalaan iyo inay miiska saaraan cuntada.

"Laga bilaabo Abriil 21, reer Alberta kasta oo shaqeeya wuxuu heli karaa ilaa seddex saacadood oo mushaar ah, fasax shaqo ilaalin ah oo qiyaas kasta oo tallaalka KOOFID-19 ah. Shaqaalaha oo dhan ay xaq u leeyihiin iyadoon loo eegin heerka shaqada ama muddada shaqada.

"Waxaan ka codsaneynaa dhamaan shaqaalaha iyo loo shaqeeyaha inay wada shaqeeyaan markay jadwaleynayaan aadista tallaalka KOOFID-19.

"Tani waa waxa saxda ah in la sameeyo waxaana sii wadi doonaa inaan qaadno talaabooyin geesinimo leh si loo ilaaliyo nolosha dadka Alberta iyo habnololeedyada iyadoo la hubinayo soo kabashada dhaqaalaheena."

### Xogta la xiriirta

- Bixinta fasaxa tallaalka ee KOOFID-19 oo lacag leh ([Providing paid COVID-19 vaccination leave](#))
- Sharciga 71: Heerarka Shaqaalaynta (KOOFID-19 Fasaxa Tallaalka) Waxka Xeerka Beddelka, 2021 ([Bill 71: Employment Standards \(COVID-19 Vaccination Leave\) Amendment Act, 2021](#))
- Xogta tallaalka KOOFID-19 ([COVID-19 vaccine information](#))
- 

### Weydiimaha warbaahinta

[Joseph Dow](#)

780-983-8714

Xoghayaha Saxaafadda, Shaqada iyo Socdaalka